

DUBLIN
REGULATION



Arji magangelyo kasto wadan keliya oo Ururrka Midawga Yurub ka tirsan u qaabilsanaado iyo in si arjiyo badan ka shaqayntooda looga maarmo. Sidaas darteed Xafiiska Federaalka waxuu ogaanayaa

waqtiga iyo meesha aad kasoo gashay, waxuuna ka waraysanayaa sababta diidaysa in wadan kale ee Ururka Midawga Yurub lagu gudbiyo oo arjigaaga u qaabilsan. Waxaa qasab ah inaad wadanka markii hore aad ka soo gashay aad iska diiwaan galisid. Qoysas badan waxay ku kala qaybsamayaan markay soo qaxayaanhadii ay is diiwaan galiyaan keliya baa laysu keeni karaa.

Talaabada 7: Jarmalka baa Arjigaaga u qaabilsan kana shaqanaya

FEDERAL OFFICE
FOR MIGRATION
AND REFUGEES



INTERVIEW

Shaqaalaha Xafiiska Federaalka baa kaa waraysan doona sababta aad arji magangelyo u dalbatay. Waxaa meesha jooga Turjumaan ku waajib ku ah inay amuuraha shaqsigaaga faafinin. Waxaa ku raaci kara garyaqaan. Waraysiga markuu dhamaado

Xafiiska Federaalka waxuu baarayaa in dacwadaada qaxooti ay xaq kuu siinayso inaad Jarmalka magangelyo ka heshid. Waxuu Xafiiska Federaalka kuu soo dirayaa go'aan qoraal ah oo arjigaaga magangelyo ku saabsan.

Hadii lagu aqoonsado, marka hore marka hore waxaad lagu siinaya sharci degenaasho oo mudo koo-ban ah. 3 sano kadib waxaa lagu siinayaa degenaasho caadi ah ama aan koobnayn, hadii sababaha lagugu aqoonsaday aanay isbedelin. Hadii arjigaaga la diido waa inaad Jarmalka ka baxdaa mudada lagu qabanayo gudaheeda. Hadii aadan mudadaas gudaheeda kaga bixin, si qasab ah baa lagaaga saarayaa hadii loo baahdo.

TELL US YOUR REASONS FOR APPLICATION

WHERE ARE YOU FROM?
WHAT HAS HAPPENED TO YOU?
DON'T WORRY, THERE WILL BE A TRANSLATOR.

GET YOUR DECISION ON YOUR APPLICATION
THE DECISION WHETHER YOU HAVE THE RIGHT FOR ASYLUM OR NOT



IMPRINT

Published by

Federal Office for Migration and Refugees (BAMF)
Frankenstr. 210, D-90461 Nürnberg
info@bamf.bund.de
www.bamf.de
Tel. +49 911 943 - 0
Fax +49 911 943 - 1000
www.bamf.de/inforefugees

Edited by

Saliha Kubilay, Tanja Sichert | Executive Staff



OTHER LANGUAGE

<http://www.bamf.de/inforefugees>

Last updated

October 2015

Printed by

Silber Druck OHG
Am Waldstrauch 1
34266 Niestetal

Designed by

Tatjana Bauer | publications |
event management | visitor's reception service

Photographs/infographics

Tomasz Lachmann



Federal Office
for Migration
and Refugees

Wargelin muhiim ah oo ku saabsan ka shaqaynta arjiga qaxootiga ee Jarmalka

SOMALI



Warqadan wargelinta ah waxay caawinaysaa dadka magangalyoodoonka ah oo Jarmalka yimaada, talaabooyinkooda ugu horeeya.

Muhiimad gaar ah: Raac amaraka xarumaha dawlada lagaa siiyo. Sidaas keliya baa ka shaqaynta arjigaaga magangalyo si dhaqso ah loo bilaabi karaa. Aqoonsiga arjigaaga magangalyo la'aantiisa Jarmalka mustaqbal kuma lihid.

Talaabada 1: Iska diiwaan geli xarun dawladeed

Markaad Jarmalka timaadid isla markiiba iska diiwaan geli xarumaha dawlada, sida booliska. U sheeg xarunta inaad arji qaxooti ah dalbanaysid. Fadlan oofi amarka ay shaqaalaha dawlada ku siiyaan. Iyagu waxay

kuu gudbinayaan xero hooy ah oo xarunta u dhow. Hadii aadan is diiwan gelin waxaad Jarmalka ku joogtaa sharci daro, taasoo sababi karto in wadanka lagaa saaro.

Talaabada 2: Imaatinka ugu horeysa ee xerada hooyga.

Marka hore waxaa lagu dejinayaa hooyga xerada qaxootiga kuugu dhow. Halkaas baad maciishad iyo wargelinta ugu horeyso ka helayaa. Meeshaas waxaa lagaa siinayaa warqad cadaynaysa inaad qaxooti diiwan gashan tahay. Talaabadan oo xitaa jinsiyadaada ama shaqsiyadaada qeexaysa waa muhiim., la'aanteedana arjigagga magangalyo lagama shaqayn karo.

GET TEMPORARY RESIDENCE PERMIT
YOUR ALLOWANCE TO STAY
„AUFENTHALTSGESTATTUNG“



while your application is in process

Talaabada 3: U gudbin gobolka u xilsaaran



Adiga ma dooran kartid gobolka lagu gudbinaayo – Waxaa lagugu qorayaa gobol ama deegaan. Gudbintu waa amar. Qaxootiga in 16ka gobol ee jarmalka si siman loogu wada qaybiyo waa lagama maarmaan, si arjigaaga magangalyo dhaqso looga shaqeeyo.

Sidaas darteed waxaa dhici karto in gobol kale lagu gudbiyo.

Fadlan ha diidin amarka gudbinta, hadii kale arjigaaga magangalyo lagama shaqayn karo, taasna waxay halis u tahay sharciga aad Jarmalka ku joogtid.

Xafiiska Federaalka ee soo degida iyo qaxootiga, oo go'aan ka gaaraya arjigaaga magangalyo waxuu ka furan yahay 16ka gobol ee Jarmalka. Arjigaaga magangalyo meel walba oo Jarmalka ah si isku mid ah oo sharciyaysan baa looga shaqaynayaa. Way dhici kartaa in gudbinta lagaa joojiyo haday jiraan daruuf shaqsiyeed, tusaale ahaan qoyskaaga oo gobol aad ku sugan tahay iyagana ku nool.

Talaabada 4: Si toos ah isaga xaadiri xerada lagugu qoray



Xarunta lagugu qorayo waxaad ku leedahay cunto, jiif iyo daawo dhaqtareed. Xaruntan oo keliya baad maciishad ku leedahay. Halkaas waxaad kale oo ka helayaa wargelin ku saabsan wixii kale

oo arjigaaga la xiriira, Xafiiska Federaalka dawlada oo adiga kuu xilsaaran. Badanaa waxuu xafiiska ka furanyahay meel xaruntaada u dhow.



Talaabada 5: Dalbo arjigaaga magangalyo

APPLY FOR ASYLUM


Arjigaaga magangalyo waa inaad adiga shaqsi ahaan ka dalbataa Xafiiska Federaalka. Xafiiska Federaalka waxuu kaa qorayaa magacaaga, jinsiyadaada iyo wixii la mid ah. Waxaa lagaa qaadayaa sawir iyo farahaaga (Caruurta ka yar 14 sano kuma jiraan). Talaabadan waa shuruuda aad ku qaadnaysid sharciga ogolaashaha joogida (warqada fiisaha). Warqada waxay cadanaysaa inaad magangalyo doon tahay, Jarmalkana aad sharci ku joogtid. Hadii aadan warqadan haysan, waxaa dhici karto in Jarmalka ssi qasab ah lagaaga musaafuriyo.



BRING ALL PERSONAL DOCUMENTS
PASSPORT, BIRTH CERTIFICATE, ETC.

AND ALL TRAVEL DOCUMENTS
TICKETS, QUITTANCES, ETC.

get copies of your documents



WE TAKE FINGERPRINTS
THIS HELPS US TO IDENTIFY YOU

AND A PHOTO
THIS ALSO HELPS US TO IDENTIFY YOU AND TO PROVIDE VALID DOCUMENTS

not from children <14 years

Talaabada 6: Ogaanshaha wadanka adiga ku qaabilsan ee ururka midawga Yurub

Xafiiska Federaalka waxuu baarayaa hadii Jarmalka ama wadan kale uu arjigaaga magangalyo u qaabilsan yahay. Baaritaanka qaabilsanaanta oo ku lifaaqsan nidaamka Dublin waa sharci ka dhaxeeya wadamada Ururka Midawga Yurub, Noorway, Iyslaand, Iswiisarka iyo liishtenistayn. Baaritaanka waxaa loo yeelayaa si